**Haddii aad qabto wax su’aalo ah, fadlan isoo wac:**

**Maine CDC Newborn Hearing Program**
207-287-5357 (V) ama 1-800-698-3624 (V)
Maine Relay: soo wac 711

**Ama booqo websaydkayaga:**
**https://bit.ly/cdc-mnhp**

**Si loo dalbado koobiyda daabacadan:**
https://bit.ly/order-screening-brochure

**Si loo aqko nooca shabakada, fadlan iskaan saar koodhka:**

**OGAYSIISKA TAKOOR LA'AANTA**

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamaha waxay u hogaansamaan sharciyada xaquuqda madaniga Federaalka iyo Gobolka oo kuma takoorto qaab ku salaysan naafada, isirka, midabka, sinjiga, jinsiga, qaabka galmada, da'da, asalka qaranka, diinta ama rumaynta siyaasadeed, tafiirta, heerka qoyska ama guurka, macluumaadka hidda sidaha, ururka, caddayntii hore ee sheegashada xaqa, ama hawl qof u dhaqdhaqaaqa, oggolaanshaha ama helida, ama hawl galka xeerarkeeda, barnaamijyada, adeegyada,ama hawlaha, ama shaqaalaynta ama qabashada sahqada.

*Markii u dambaysay la cusboonaysiiyay: Janaayo 2023*



# Maqalka Dhalaanka Carruurta Da'da yar:

# Hagaha Qoyska

# Barnaamijka Dhegaysiga Ilmaha Dhawaan dhashay Maine

Barnaamijka Maqalka Ilmaha Dhawaan dhashay waxay siiyaan macluumaad qoysaska waxa ku saabsan baadhitaanka maqalka, qiimaynta la socodka ah, iyo wax ka qabadka hore iyo adeegyada taageerada qoyska. Cusbitaalada gudaha Maine waxay qabtaan baadhitaanada maqalka ilmaha dhawaan dhashay xaga dhalashada. Haddii cusbitaalku aanu qaban karin baadhitaanka maqalka, waa inay kaa caawisaa habbaynta si baadhitaanka loo sameeyo wakhti aan ka dambayn. Haddii ilmahaagu aanu ku dhalan cusbitaalka Maine, waydii adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga ee ku saabsan baadhitaanka maqalka ama la xidhiidh Barnaamijka Maqalka Ilmaha Dhawaan dhashay ee Maine.

### Sababtee ayay muhiim u tahay si loo baadho maqalka ilmahayga?

Waa muhiim in la ogaado wax ku saabsan waayid kasta oo maqalka ah sida ugu dhakhsaha badan ee suuragal ah, maadaama ay tani u oggolaan doonto in ilmaha la siiyo caawimada gaarka ah ee looga baahan yahay luuqadda iyo koboca bulshadda.

Waayida maqalka waa cudurka guud ahaan badanka ee dhacaya ee dhallaanka gudahaa Maraykanka oo waxay saamaysaa wax badan sida 1 ilaa 3 ka baxsan 1,000 dhallaanka dhasha sanad kasta. Iyaddoon lahayn baadhitaanka rasmiga ah, had iyo jeer suuragal maaha in la ogaado haddii ilmahu uu qabo waayida maqalka marka lala hadlayo iyaga.

Labba sanandood ee u horeeya ee ilmaha noloshiisa waa u muhiim hadalka iyo koboca luuqadda. Daraasadaha muujinaya in ka hor Baadhitaanka Dhegaysiga Ilmaha Dhashay Caalami ahaan, badanka waayida dhegaysiga lama aqoonsan ilaa ay ka wayn yihiin labba sano jir. Da'daas, badanka carruurta wax maqlaya waxay fahmaan wax badan oo ku saabsan luqadda hadalka, oo waxaa dhici karta inay bilaabeen inay hadlaan.

**Natiijooyinka baadhitaanka maqalka ilmahaaga yar ee dhawaan dhashay:**

Taariikhda baadhitaanka dhegaysiga: ______________________________

- ☐ **Dhaafay;** ma jiro baadhitaan dheeraad ah oo loo baahan yahay
- ☐ **Gudbay iyaddoo wadata Sababaha Khatarta;** baadhitaan dheeraad ah ayaa loo baahan yahay, arag hoos wixii macluumaadka ballanta la socodka ah
- ☐ **Ma gudbin;** baadhitaanka dheeraad ah ayaa loo baahan yahay, arag hoos wixii ah macluumaadka ballanta la socodka ah
- ☐ **Baadhitaanka dhegaysiga lama dhammaystirin;** arag hoos wixii ah macluumamadka la socodka ee ballanta
- ☐ **Sababta baadhida lama dhammaystirin:**

______________________________

**Ballanta waxaa loo qabtay ilmahaaga:**

☐ **Baadhitaanka Maqalka** ☐ **Qiimaynta la socodka ah**

Taariikhda:__________________ Wakhtiga: ____________________

Adeeg bixiyaha (Cusbitaalka Carruurta dhalata, Khabiirka Maqalka):

______________________________

Cinwaanka:

______________________________

______________________________

Haddii aad u baahan tahay inaad jadwal dambe qabsato, fadlan soo wac:

______________________________

Ama iimayl, fariin qoraal ah, ama xidhiidhka la marayo websaydka:

______________________________

## Ilaha Gobolka oo Dhan

**Adeegyada Koriinka Ilmaha** (CDS) waa Wakaalada Hormoodka ah gudaha gobolka Maine ee ka masuulka ah bixinta Wax ka qabadka Hore (dhalashada 2 sanadood) iyo Waxbarashadda Gaarka ah iyo Adeegyada La xidhiidha (da'aha 3-5) sida waafaqsan Shakhsiyaadka Naafada ah Xeerka Waxbarashadda (IDEA) hoos timaada kormeerka Waaxda Waxbarashadda Maine. Wax ka qabadka hore waxaa lagu bixiyaa hoosta Qaybta C ee IDEA iyaddoo la isticmaalayo adeegyada caddaynta ku salaysan gudaha deegaanka dabiiciga ah ee dhallaanka iyo socod baradka qaba daahida koriinka iyo naafanimada iyo qoysaskooda. Kooxda Wax ka qabadka Hore ee ka socota goobaha goboleed ee CDS waxay taageeraan qoyska iyo daryeel bixiyayaasha koowaad kordhinta ka qayb qaadashada ilmaha, madax banaanida, iyo xidhiidhada bulshadda gudaha qaabka hababka caadiga ah ee maalinlaha ah iyo hawlaha. Waxbarashadda Gaarka ah iyo Adeegyaa La xidhiidha waxaa lagu bixiyaa hoosta Qaybta B ee IDEA oo waxay xaqiijisaa in carruurta la aqoonsaday ay helaan Waxbarashadda Dad waynaha Habboon ee Bilaashka ah (FAPE). Adeegyada wax kharash ah qoyska laguma siiyo.

Central Office, Augusta
207-624-6660

Adeegyada Koriinka Ilmaha
146 State House Station
Augusta, ME 04333

**Wax ka qabadka Hore iyo Adeegyada Qoyska** (EIFS), Waaxda Xarunta Waxbarashadda Maine ee Dhegoolaha iyo Kuwa Maqalku ku adag yahay (MECDHH), waxay xooga saaraan taageerida qosaska leh carruurta dhegoolaha ama maqalku ku adag yahay ama qaba waayida maqalka laga shakisan yahay. Iyaddoo la shaqaynaysa CDS, EIFS waxay taageertaa qoyska iyo xirfad yaqaanada wadanka oo dhan si loo xaqiijiyo adeegyada ugu fiican ee carruurta dhegoolaha ah ama maqalku ku adag yahay iyo qoysaskooda. EIFS waxay bixisaa macluumaad dhammaystiran, oo aan eex ahayn si loo taageero qoysaska inay gaadhaan go'aamada ku habboon qiimayaashooda iyo ahmiyadaha, oo waxay xaqiijiyaan taageerada diyaarka ah si loo caawiyo inay buuxiyaan hadafyadooda. EIFS waxaa loo heli karaa qoyska carruurta dhegoolaha ah ama maqalku ku adag yahay laga bilaabo dhalashada ilaa dhalashadooda saddexaad. Adeegyada wax kharash ah qoyska laguma siiyo.

1-866-231-8910 ama
207-781-6335 (Codka)

Wax ka qabadka Hore iyo Adeegyada
Qoyska
1 Mackworth Island
Falmouth, ME 04105

**The Maine Newborn Hearing Program (MNHP)** waa qayb ka mid ah Maine CDC, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamaha. MNHP waxay isku xidhaan barnaamijyada baadhitaanka maqalka ilmaha dhawaan dhashay  iyo qiimaynaha la socodka ah ee dhallaanka ee aan gudbin baadhitaanka maqalka ama u baahan baadhitaanka dheeraadka ah oo waxaa loo heli karaa qoysaska iyo xirfad yaqaanada ee ilaha iyo rixraaca macluumaadka Adeegyada wax kharash ah qoyska laguma siiyo. Wixii macluumaad dheeraad ah la xidhiidh:

207-287-8427 ama
1-800-698-3624 (Codka)
Maine relay: soo wac 711

Barnaamijka Dhegaysiga Ilmaha Dhawaan
dhashay Maine
Key Bank Plaza, 7th Floor
286 Water Street Augusta, ME 04333-0011

### Sidee baadhitaanka maqalka loo sameeyaa, ilaa intee ayay qaadataa, oo wax ma yeeshaa ilmahayaga?

Codadka jilicsan waxay metelaan dhegaha ilmahaaga dhexda mikirifoomka dhegta ama qalabyada kale ee dhegaysiga. Waayirada u eeg sida ulaha ayaa lagu dhejiyaa madaxa ilmahaaga. Waayirada waxay soo qaadaan jawaabaha codadkan. Natiijada waxaa loo bixiyaa sida PASS ama REFER. Baadhitaankan waxaa la sameeyaa marka ilmahaagu uu hurdo ama uu degen yahay oo waxay qaadan kartaa ugu yaraan 15 daqiiqo. Waxba yeeli mayso ilmahaaga.

### Maxay GUDBAY ama GUDBIN la macno tahay?

Haddii ilmahaaga uu haysto natiijada GUDBAY, waxay sheegaysaa in maqalka ilmahaagu caadi ahaa wakhtiga baadhitaanka. Haddii ilmahaagu haysto natiijada GUDBI, ilmahaagu waxa uu u baahan yahay baadhitaanka la socodka ah. Tani caadi maaha. Waxyaabaha qaar ayaa fara geliya baadhitaanka, sida dheecaanka dhalashada gudaha kanaalka dhegta ama codka aaga baadhitaanka. Natiijada GUDBI waxay sidoo kale la macno ahaan kartaa ilmahaagu inuu qabo waayida maqalka. Haddii ilmahaagu u baahan yahay baadhitaanka la socodka ah, faahfaahinta ballanta waxaa ku wadaagi doonaa shaqaalaha cusbitaalka bogga 7 ee buug yarahan, ama adeeg bixiyaha daryeelka koowaad ee ilmahaaga.

### Waa maxay calaamadaha waayida maqalka oo maxaan u qaban karaa ilmahayaga?

Natiijada baadhitaanka maqalka waxa uu muujinayaa sida ilmahaagu uu wax u maqlaayey maalintaas. Waalid ahaan, waad garanaysaa waxa u wanaagsan ilmahaaga, oo waxaad dooni in lala socdo maqalka ilmahaaga iyo hadalka markay koraan. Tilmaamaha qaar waxaa laga heli karaa labbada bog ee xiga. Kaydi buug yarahan si uu kaaga caawiyo inaad aragto maqalka ilmahaaga ilaa labba jirka. Haddii aad qabto walaac ku saabsan maqalka ilmahaaga wakhti kasta, la hadal adeeg bixiyaha daryeelka koowaad ee ilmahaaga.

| | Ilmahaagu waa inuu | Waa inuu | |
|---|---|---|---|
| Dhalashada ilaa 3 bilood | • Ka naxaa codka kediska ah ee qaylada dheer.<br>• Ku degaa ama ku degenaadaa codkaaga.<br>• Qayliyaa, uuc yidhaahdaa, ama qoslaa. | • Mar kasta oo ilmahaagu uu codad sameeyo, si wanaaagsan u xooji isku daygooda adoo iska dhigaya iyaga.<br>• Ilmahaaga ku hay meel kuu dhow. Lux, u hees, ula hadal si degen oo wax u akhri iyaga.<br>• La hadal ilmahaaga addoo isticmaalaya magacooda marka aad ka shaqaynayso | Dhalashada ilaa 3 bilood |
| 3–6 bilood | • Leexi madaxa ama indhaha si aad u hesho cod la mid ah.<br>• Ku ciyaar codad samayn iyo dhawaqyo.<br>• Sida boombalooyinka codka sameeya. | • Dhegayso oo samee codadka ilmahaaga oo kale.<br>• Hubso ilmahaaga inaad wakhti siiso uu ku jawaaabo.Ilmahaaga ku hay meel kuu dhow. U hees, uga sheekee sheekooyin, oo ka hadal boombalooyinka iyo sheeyada kale gudaha guriga.<br>• La ciyaar ciyaaro sida "Peek-a-boo" ama "Pat-a-cake." | 3–9 bilood |
| 6–9 bilood | • Ka jawaab magacooda.<br>• Bilaaba fahmida erayada guud sida "maya," iyo "nabad gelyo."<br>• Iska yeelyeelada samaynta codadka sida qufaca, dhag ka siiya carabka, ama isku qabashada debnaha. | | |
| 9–12 bilood | • Ku celi erayada fudud iyo codadka aad samayso.<br>• Tilmaan ama gaadh sheeyada caadiga ah marka la waydiiyo.<br>• Uga jawaaba si kala duwan hadalka faraxada leh iyo ka cadhada leh.<br>• Raac tilmaamaha fudud.<br>• Fahmaya ilaa 50 eray | • Samee hadalka codadka fudud si loo arko haddii ilmahaagu iska yeel yeelo (bah -bah, gah-gah).<br>• Dareenka u soo jeedi haddii ilmahaagu yidhaahdo "Maamo" ama "Aabo."<br>• Kala hadal ilmahaaga wax ku saabsan boombalooyinkiisa iyo sheeyada gudaga gurigaaga.<br>• Daar heesha ciyaaraha.U tilmaan sawirada gudaha buuggaagtooda oo la hadal iyaga. | 9–12 bilood |
| 12–18 bilood | • Ku bood muusiga.<br>• Ku hadal waxa sida codadka jumladaha, oo wata erayo la fahmi karo.<br>• Aqoonsada dadka, qaybaha jidhka, iyo boombalooyinka.<br>• Xiiseeye dhegaysiga sheekooyinka oo ku akhriyaa si cod dheer. | • Tus ilmahaaga qaybahooda jidhka, "Halkan waa sanka ilmaha, isha, dhegta," iwm.<br>• Tus sawirka buuggaagta fudud, ka caawi rogida boggaga, ka hadal wax ku saabsan sawirada.<br>• Ciyaarta: "Mee Aabahay? (Hooyo?)" oo tilmaan Aabbo (Hooyo). "Mee eygu? (ama boonbalo)," "Muxuu eygu yidhi? Bow-wow." | 12–18 bilood |
| 18–24 bilood | • Ku fahma adiga marka aad uga yeedho qol kale.<br>• Tilmaan qaybaha jidhka marka la waydiiyo.<br>• Bilow inaad la hadasho isku xidhka erayo labba ah, sida "Hooyo, wax badan!"<br>• Doorbid buuggaagta qaar oo kuu keena adiga.<br>• Fahmaya 250-500 erayo ah (marka uu gaadho 24 bilood) | • U akhri sheekooyinka fudud ilmahaaga oo waydii su'aalo "Meeday bisadaydii?" oo tilmaan sawirka.<br>• Sii tilmaamaha, "Saar caruusada kursiga, "Ku rid kubbada gudaha sanduuqa." | 18–24 bilood |